



ismaamulka san diego

# daadka biyaha waraabka beerka



## ***Aan Kuligeen Qaadano Doorkeena!***

Inta badan dadka deegaanka ayaa walaac ka qaba nadiifinta marinnadeena biyaha. Xaqiiqdii, xog aruurino laga sameeyay Ismaamulka San Diego ayaa muujinaaya **in ka badan 50% dadka deegaanku ay aaminsan yihiin in wasaqda gasha balida, harooyinka, iyo xeebaha ay si toos ah u saamayso ayaga iyo qoysaskooda.**

## ***Diyaar ayaan u nahay Inaan ku Caawino.***

Barnaamijka **Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ka taageeraaya dadka deegaanka dedaaladooda si looga hortago wasaqda biyaha asagoo siinaaya **tilmaamahaan muhiimka ah ee yaraynta biyaha daadka** ee mara fagaaga, cawska, iyo beeraha—oo qayb wayn ka ah wasaqda biyaha.



**Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka raabka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN** kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, wabiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda, ayna ku jiraan biyaha daadka, ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.

## ***Maxaad Samayn Kartaa Si aad U ilaaliso Nadaafada Biyaheena?***

- **Wax ka badal buufiyaasha** si aysan biyaha ugu firdhin wadooyinka iyo geesaha wadada.
- **Dayactir meelaha dilaaca** ama buufiyaasha jabay.
- **Ku waraabi mareeg gaaban** si aad ugu ogolaato biyaha inay ciidu liqdo.
- **Subixii waraabi** ama fiidka danbe marka banaanku qaboow yahay.
- **Ku badal geedaha nugul** geedaha abaarta u adkaysta ama kuwa deegaanka.

***Waad ku mahadsan tahay inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.***

***Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah.***

**1-888-846-0800**

watersheds@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater